



Taar: 19/10/2020

WAR-MURTIYEED

Wasaaradda Amniga Gudaha dawladda Galmudug waxay ka xun tahay kana tacsiyaynaysaa dhacdadii dilka ahayd ee ka dhacday Balliga Guulmawaydo ee agagaarka Saaxo – gobolka Mudug habeenimadii Axaddu soo galaysay ee **17 Oktoobar 2020** abaaro saacaddu markay ahayd 23:30pm, dhacadadaas oo dil loogu geystay labada marxuum ee kala ah:

1. AUN **Bishaar Cabdullaahi Guure** iyo
2. AUN **Cali Khaliif Xirsi Shire**

Falkaas foosha xun waxaa lala xiriirinayaa in ay ka danbeeyeen eedaysanayaasha saddexda ah ee kala ah:

1. **Cabdi Cabdullaahi Jaamac** Ina Qoran Cabdi Axmed, 18 jir ah ku dhashay Gobolka Mudug
2. **Cabdul Cabdi Maxamuud** Ina Muraayad Maxamuud Jaamac, 22 jir ah, ku dhashay Gobolka Mudug iyo
3. **Cawil Khaliif Warsame** ina Safiyo Maxamed Diini, 20 jir ah kuna dhashay gobolka Mudug.

Wasaaraddu Amnigu ayadoo gudanaysa waajibkeeda kaga aadan ilaalinta xasiloonida iyo wada noolaashaha dadka walaalaha ah iyo heshiisyadii horey loogu gaaray deegaanadaas waxay saacado ka dib markii falkaasi uu dhacay hawlgalisay ciidamada amniga Galmudug oo isugu jira: Daraawiish, Booliis iyo Nabadsugid kuwaasoo weli dhulka baadiyaha ah ee deegaankii falku ka dhacay u dhow ka baadigoobaya kooxihii dilka geystay.

Haddaba, maamulka gobolka Mudug, kan degmada, waxgaradka iyo inta samaha jecel waxaa laga codsanayaa in si wadajir ah ay uga qeybqaataan kuna gacan siiyaan ciidamada amniga sidii gacanta loogu soo dhigi lahaa kooxahaas fidno-wadayaasha ah iyo intii ku gacansiisay si loo horgeeyo cadaaladda.

Ugu danbayn wasaaraddu waxay bogaadinaysaa dareenka culimaa'udiinka iyo odoyaasha dhaqanka gobolka Mudug sida wanaagsan ee ay uga falceliyeen dhacdadaas foosha xun iyo kaalinta muuqata ee ay ka qaadanayaan in lagu wada noolaado nabad iyo deris wanaag.

Wabillaahi tawfiiq